



# Ku soo dhawow Dugsiga xanaanada ee Norrköping!



 [norrkoping.se](https://norrkoping.se)

 [facebook.com/Norrkopingskommun](https://facebook.com/Norrkopingskommun)

 [instagram.com/norrkopings\\_kommun](https://instagram.com/norrkopings_kommun)



**NORRKÖPING**

# Ku soo dhawow Dugsiga xanaanada ee Norrköping!

Dugsiga xanaanada waxaa loogu talagalay carruurta u dhaxaysa 1 iyo 6 jir. Waa inuu ahaado wax leh madadaalo oo waxbarasho fiican u leh dhammaan caruurta dhigata halkaas.

Dugsiga xanaanada way ku horumaraan carruurta oo wax ku bartaan dhinaca in la ciyaaro, wax la abuurto oo wax la ogaado – keligood iyo si wadajir ah iyadoo loola samaynayo carruurta iyo dadka waaweyn.

Dugsiga xanaanadu waa talaabada ugu horeysa ee dhinaca waxbarashada Iswiidhishka. Halkan waxaa la dhigaa aasaaska waxbarashada ilmaha, taas oo sii socota inta ka hadhaya nololaha oo dhan.

\* Macluumaadka waxaa toos loogu turjumi karaa dhowr luqadood boggan internetka.

Sidan ayuu u shaqeeyaa  
dugsiga xanaanada

Wixii dheeraad ah ka akhri  
norrkoping.se\*



Iskaan garee calaamadda QR  
adigoo isticmaalaya kaamarada  
moobilkaaga ama tag:

[www.norrkoping.se/forskola](http://www.norrkoping.se/forskola)





## **Luqadda ilmaha ayaa sii horumartaa**

Dugsiga xanaanada waxaa shaqaaluhu ay muhiimad xoog ah saaraan horumarka luqadda ee ilmaha. Iyagu waxay ka shaqeeyaan luqadda inta lagu jiro dhammaan xaaladaha kala duwan ee marka la joogo dugsiga xanaanada.

Kor wax u akhriska iyo wada-hadal ku saabsan qoraal waxay qayb muhiim ah u tahay in la dardargeliyo luqadda ilmaha ee dhinaca Iswiidhishka iyo afka hooyo labadaba.

## **Qaababka cabbir ee waaqiciga ah**

Gudaha dugsiga xanaanada wax ayay ku abuuraan kuna cabbiraan carruurta iyagoo u sii maraya tusaale ahaan sawir, dhaq-dhaqaaq, muusig iyo dhaans.

## **Ciyaartu muhiim ayay ka tahay dugsiga xanaanada**

Ciyaartu boos muhiim ah ayay kaga jirtaa dugsiga xanaanada. Carruurta ciyaartooda kediska ah, iyo la ciyaaridda shaqaalaha, waa qaybo muhiim u ah waxbaridda. Dhinaca ciyaarta ayaa carruurta kaga shaqaysiiyaan aragtiddooda. Ciyaartu waxay xitaa horumarisaa awoodda khayaal abuuridda, luqadda iyo wada-shaqaynta lala yeelanayo carruurta kale iyo dadka waaweyn. other children and adults.

## **Xisaabta iyo farsamada dhijitaalka ah**

Dugsiga xanaanada carruurta waxay wax ka ogaadaan xisaabta, cilmiga deegaanka iyo farsadmada. Taasi waxay sameeyaan iyadoo loo marayo in la baaro oo laga fikiro dhinaca erayada kala duwan iyo dhibaatooyinka maalinlaha ah. Carruurta waxay xitaa tijaabiyaan qalab dhijitaal ah oo kala duwan.

## Amaanka iyo aasaaska qiimeynta

Dugsiga xanaanada wuxuu aasaaska u dhigaa hawsha aasaaska ee qiimeynta iyo in la kordhiyo carruurta fahankooda ah waxa dimoqraadiyad ay tahay. Carruurta waxay xitaa fursad u helaan inay horumariyaan fahanka qof kale xaaladiisa iyo tixgelinta, iyo fahamka in dadka oo dhan isku qiimo yahay. Carruurta waxay xaq u leeyihiin ka qaybqaadasho iyo raad ku yeelasho.

Hawl muhiim u ah dugsiga xanaanada waa in carruurta iyo dadka waaweyn labaduba ay dareemaan amaan. Dugsiga xanaanada shaqaalihiiisu waxay wada-shaqayn dhow la leeyihiin waalidka ilmaha.



## Kuwee dhigta dugsiga xanaanada?

Dugsiga xanaanada waxaa jooga carruur ah da'da 1 ilaa 6 jir.

Boos dugsiga xanaanada ah waxaa lagu casuumaa laga bilaabo marka ilmuhu yahay 1 sano

- marka waalidku shaqeeyaan ama wax bartaan
- haddii ilmuhu leeyahay baahi gaar ah dhinaca horumarkiisa.

Booska dugsiga xanaanada waa 15 saacadood toddobaadkiiba oo waxaa lagu casuumaa

- laga bilaabo bisha Agoosto ee sanadka ilmuhu buuxinayo 3 jir
- marka waalidku yahay bilaa shaqo ama fasax waalid oo walaal ah ay ku jiraan.

## Waa maxay kharashka boos ah dhinaca dugsiga xanaanada?

Kharashka booska dugsiga xanaanada waxaa lagu go'aamiyaa nooca dakhli ee waalidku haysto. Laakiin waxaa jira xad sare oo ah inta ugu sareysa ee kharashkan noqonayo, waxa lagu magacaabo kharashka ugu sareeya.

Laga bilaabo xiliga dayrta ee sanadka uu ilmuhu buuxinayo 3 jir waxaa ilmuhu xaq u leeyahay waxa lagu magacaabo dugsiga xanaanada ee guud. Markaas ka dib ilmuhu wuxuu ku jiri karaa iskool-horaadka 15 saacadood todobaadkiiba lacag la'aan.



## A Dugsi xanaano oo loogu talo-galay carruur badan – sharci cusub laga bilaabo 1 Julaaq 2023

Ujeeddadda sharciga cusub waa in la helo in carruur badan ay tagaan dugsiga xanaanada oo iyaga fursad loo siiyo horumar luqadda Iswiidhishka ah oo sii fiicnaada. Sharcigan cusub wuxuu sheegayaa in degmooyinka oo dhan ay raadiyaan qoysaska haysta carruur ah da'da 3 ilaa 6 jir ee aan tegin dugsi xanaano. Tani waa si loogu wargeliyo dugsiga xanaanada ujeedadiisa iyo xaq ay carruutu u leeyihiin dugsi xanaano.

Degmadu waa inay xitaa boos dugsi xanaano ku casuuntaa carruurta ah da'da 3 ilaa 5 jir ee xaq u leh dugsiga xanaano ee guud, xitaa haddii waalidka ilmuhu aanay sidaas codsan.

Tani waxay khuseysaa haddii

- ilmuhu ku dhashay dalka dibediisa oo joogay gudaha Iswiidhan muddo ah ugu badnaan shan sano, ama
- waalidka carruurta ay ku dhasheen dalka dibediisa, deganyihiin Iswiidhan oo halkan joogeen muddo ah ugu badnaan shan sano.





## Codso boos dugsi xanaano

Adigu waxaad codsan kartaa boos dugsi xanaano ugu horeyn lix bilood ka hor marka aad rabto in ilmuhu bilaabayo. Ilmahaagu waa inuu buuxiyay 1 sano marka isaga ama iyadu bilaabaya dugsiga xanaano.

Si loo codsado boos waxaad u baahantahay inaad haysato lambarka shakhsiga ee Iswiidhan iyo cinwaan ii-mayl.

**Codsiga waxaad ka samaynaysaa dhinaca adeegayaga elaktarooniga ah:**

[norrkoping.ist.se/norrkoping/login.htm](http://norrkoping.ist.se/norrkoping/login.htm)

Haddii aad rabto in ilmahaagu dhigto dugsi xanaano oo madax-banaan la xiriir dugsigaas xanaano.

## Xarumaha qoysaska – dugsiyada xanaano ee furan

Xarunta qoyska waa goob kulan looguna talagalay dhammaan qoysaska haysta carruur ah da'da 0 ilaa 6 jir. Halkan wuxuu ilmuhu la kulmi karaa saaxiibo lala ciyaaro isla mar ahaanta ay dadka waaweyn la xiriirayaan oo helayaan talo iyo taageero dhinaca doorka waalidka. Dugsiga xanaanada ee furan waxaad xitaa ka heli kartaa warbixin ku saabsan sida dugsiga xanaano u shaqeeyo oo helaysaa taageero marka aad dooranayso dugsi xanaano. Rugta qoyska waxaa laga helaa rugta daryeelka caafimaadka carruurta, dugsiga xanaanada ee furan iyo xafiiska arrimaha bulshada.

**Hel rugaha qoyska iyo dugsiyada xanaano ee furan:** [norrkoping.se/familjecentraler](http://norrkoping.se/familjecentraler)

Sidan ayuu u shaqeeyaa  
dugsiga xanaanada

Wixii dheeraad ah ka akhri  
[norrkoping.se](http://norrkoping.se)\*



Iskaan garee calaamadda QR  
adigoo isticmaalaya kaamarada  
moobilkaaga ama tag:

[www.norrkoping.se/forskola](http://www.norrkoping.se/forskola)

## Su'aalo ma qabtaa?

Ku soo dhawow in aad la xiriirto degmada  
**Norrköping xarunteeda xiriirka**  
Trädgårdsgatan 21, Norrköping  
011-15 00 00  
[norrkoping.kommun@norrkoping.se](mailto:norrkoping.kommun@norrkoping.se)

**Norrköping xarunteeda xiriirka**

Trädgårdsgatan 21, 602 42 Norrköping

011-15 00 00

[norrkoping.kommun@norrkoping.se](mailto:norrkoping.kommun@norrkoping.se)



**NORRKÖPING**